



TERVEYDEN JA  
HYVINVOINNIN LAITOS



Finland lama gudo wiilasha haddii aysan jirin sababo caafimaad. Haddii aad gudo iyo haddii aadan gudin oo iska dhaafsto ma aha arin saamayn ku yeelanaysa wiilkaagu darajadda uu bulshadan fiilaand ku dhex lee yahay iyo xuquuqhiisa.

Sababo aan caafimaadka ahayn wiilasha loo gudo Finland dhexdeeda waa arin ku lug leh bulshooyinka qaarkood dhaqankooda iyo diimahooda. Finland dhexdeeda waxaa gudniin loogu sameeyaa sababo ka baxsan caafimaadka qiyaastii 400 oo wiil sanad kasta.

#### **Haddii aad doonayo in wiilkaaga la gudo, waa in aad raacdoo talooyinka Wasaaradda sooshalka- iyo caafimaadka**

1. Gudniinka waxa kaliya oo samayn kara dhakhtar, dhakhtarkas oo haysta ogolaansho ah inuu Finland dhexdeeda ka shaqayn karo. Warbixino ku saabsan dhakhaatiirta gudniinka samaysa waxaad weydiin kartaa Finland dhexdeeda dadka kugula nool ee ah kuwo dhaqankaaga iyo diintaada wakiiladda u ah.
2. Gudniinka aan sababo caafimaad daraadood loo samayn, laguma sameeyo xarumaha caafimaadka ee bobliga ah ama shacabka loogu tala galay sida xarumaha caafimaadka ee xaafaddaha ama isbitaalada guud. Haddii aad wiilkaaga doonaysid in laguu gudo, waxaa lagaa rabaa inaad adigu hawsha ka soo qorshaysato xarumaha barayfadka ah ee daryeelka caafimaadka. Haddiise gudniinka loo samaynayo sababo caafimaad aawadood waxaa markaas ilmaha lagu gudaa Finland dhexdeeda xarumaha daryeelka caafimaadka ee bobliga ah ama shacabka. Sababo caafimaad waxaa noqon kara sida buuryada ilmaha oo barar iyo nabar galoo.
3. Dhakhtarka waxaa laga rabaa inuu ka taxadaro in gudniinku u dhaco qaab nadiif ah oo ah nadaafad sare, si markaas aan nabarku hurgumo ama infagshan u qaadin.
4. Gudniinku wuxuu wiilasha u keenaa xanuun. Dhakhtarka gudniinka samaynaya waa in uu ka taxadaro in wiilkaagu uu helo kiniiniyal ku filan oo xanuunka ka jabiya ka hor inta uusan gudin iyo markuu gudo ka dibba.
5. Gudniinku wuxuu marmar keeni karaa dhibaato. Isla marka la gudoba waxaa dhici karta in wiilkaagu uu tusaale ahaan qado infagshan ama hurgumo. Nabarka hurgumay waxaa ka imaan kara dheecaan, wuxuuna keeni karaa xanuun. Inay suurtogal tahay in wakhti dheer ka dib ama marka wiilku weynado ka dib ay dhibaato u timaado gudniinka la xiriirta cid garanaysa ma jirto. Dhakhtarka waxaa laga rabaa inuu arimahan idii sheego ka hor inta aydan u ogolaan inuu ilmihiina gudo. Dhakhtarku wuxuu idin siinaya talooyin ah sida aad yeelaysaan marka uu gudo wiilkiina ka dib.
6. In ilmaha la gudo waxaa loo baahan yahay ogolaansho ay bixiyaan waalidka ama dadka ilmaha sida sharciyanka ah uga masuulka ah. Haddii dadka ilmaha masuuliyaddiisa sida sharciyanka ugu qoran ay yihiin labo qof laboododaba waa loo baahan yahay ogolaanshahooda. Waa in aad saxiixdaan warqad aad ku ogolaanaysaan arinta, warqaddahaas oo aad ku bixinaysaan ogolaansho ah in wiilkiina la gudo.
7. In la sameeyo gudniinka waxaa kaloo shardi u ah in wiilkiina laftigiisa ogolaansho laga helo. Waxaa lagaa doonayaan inaad wiilkaaga laftigiisa weydiisaan ogolaansho ah inuu ogol yahay in la gudo, haddii uu ku jiro da' wax la su'aali karo, oo arintu ay suurtogal tahay in lagala sheekaysto. Idinka iyo dhakhtarka gudayaaba waa in aad u sheegtaan ilmaha gudniinka oo ugu sharaxdaan qaabka ugu fiican ee macquulka ah. Haddii wiilkiinu uu fahmayo jaa macnaha gudniinku lee yahay oo uusan doonany in la gudo, markaas lama gudi karo. Haddii wiilkiina da'diisu tahay 12-sano jir wuu fahmi karaa arinta, inkasta oo caruurtu iyaga oo isku da' ah ay haddana kala duwan tahay sida arimaha u fahmaan.
8. Idinka waalidka ah oo ilmaha ka masuulka ah ayaa iska bixinaya kharashka iyo lacagta ku baxaysa gudniinka.